

Waraqaha soo socda ayaad u baahantahay/baahantihiin in aad soo gudbisaan mar kasta oo taageero masruuf la codsanayo:

Codsigi bishan la soo gudbiyo wuxuu khuseeya bisha soo socota.

(Tusaale ahaan: codsiga taageerada masruufka ee Jannaayo 2021 waxaa la soo gudbinayaa Diseembar 2020.)

- **Warbixin kooban oo akoonka ku saabsan**, oo laga keenayo dhammaan bangiyada aad akoomanka ku leedihid.
- **Qoraal akoonka laga soo saaray**, oo ku saabsan 3 bilood ee la soo dhaafay oo akoon walbana mid laga keenayo. Taasi xitaa wey khuseysaa akoomanki la xiray.
- **Qorshe markaas taagan** oo tusaale ahaan laga keenayo Xafiiska shaqada.
- **Faaturada kirada oo dhammeystiran** oo khuseysa bisha markaas taagan.
- **Faahfaahinta mushaarka**, iyo faahfaahinnada kale ee ku aaddan lacagaha akoonkaaga ay tusaale ahaan ku soo shubaan Qasnadda ceymiska shaqo la'aanta, Qasnadda ceymiska iwm.
- **Caddeyta goobjoognimada**, haddii aad SFI-dhigatid, baraagtiig aaddid iwm.
- **Wax markaas shaqeynaya oo caddeynaya in aad buktid** oo uu dhakhtar soo diryay haddii aadan shaqo raadsan karin sabab caafimaad darro awgeed.
- **Waxyaabaha ay ku saleysanyihiin faatuurooyinka** aad codsanaysid in lacagtooda lagu soo diro ee bil kasta isbeddela, (tusaale ahaan koronto iyo biyo) Haddii kharashaadka kale ay isbeddelaan waa in sidoo kale la soo gudbiyaa waxa ay kuwaasi ku saleysanyihiin. Ha illoobin in aad soo gudbisid faatuuro dhammeystiran.
- Haddii tusaale ahaan la codsanayo **ookiyaalo ama darveel ilko** waa in mar walba la soo gudbiyaa hindisaha kharashka ku kacaya.
- Waxyaabaha ay ku saleysanyihiin **kharashaadka dawada** ee laga yaabo in ay jiraan (rasiid iyo faahfaahinta warqadda dawada ee uu dhakhtarku qoryay), **la kulanka dhakhtarkana** (faatuuro ama rasiid)
- **Dhammaan maccluumaadki cussub** ee soo kordha.



- Codsiyada waa in bil walba la soo gudbiyaa inta u dhexeysa **maalinta 20:ka – 25:ka.**